



1437 Bannock St.
Denver, CO 80202
p: 720.865.7695
JIC_news@denvergov.org

War-Saxaafadeed Faafin Degdeg ah

Isniin, Abriil 6, 2020

DENVER OO KORDHISAY MUDDADA AMARKA GURYAHA JOOGA, WAXAANA LA WADA WACYIGELIN IYO DHAQANGELIN

DENVER – Duqa Magaalada ee Michael B. Hancock ayaa amar si degdeg ah u dhaqangalaya kordhiyay muddada uu soconayo Amarka Caafimaadka Bulshada ee Guryaha Jooga oo uu bixiyay Maamulka Magaalada iyo Degmada Denver ilaa iyo Abriil 30, 2020. Magaalada waxa ay sidoo kale muddada ku kordhineysaa xayiraadda ay saartay kulamada dadka badan illaa April 30, waxa ayna bilaabeysa in ay ku soo bandhigto Warbixin Maalmeedka Xaaladaha Degdegga ah bogga denvergov.org.

“Waxaa aan aad ugu faraxsanahay una mahadcelinaya dhammaan shacabka Denver oo guryaha jooga isla markaana ku dhaqmaya kala fogaanshaha,” ayuu yiri Duqa Magaalada Hancock xilli uu muddo dheereyn ku sameynayey amarka. “Waa aan ogahay in ay tani u sahlaneyn dad badan, balse marki la eego xogta hadda jirta iyo talada khabiirrada ee ku aaddan faafidda COVID-19 bulshadeenna dhexdeeda iyo guud ahaan waddanka, kuwani waa tallaabooyinka noo gudbin lahaa dhinaca kale ee xaaladda isla markaana badbaadin lahaa caafimaadka tiro badan oo dad ah.”.

Amarkii hore waxaa uu ku ekaa Abriil 11. Maadaama la kordhiyay wakhtiga uu soconayo amarka, ayaa maamulka magaalada waxa uu bixin doonaa wacyelin dheeri ah iyo dhaqangelin iyada oo uu Duqa Magaalada ku dhiirrigelinayo shacabka in ay guryaha joogaan waxa aan ka ahayn ganacsiyada laga maarmaanka ah ama hawlaha muhiimka ah, ayna nabad ku joogaan iyaga oo u hoggaansamaya tilmaamaha amarka caafimaadka dadweynaha xilli uu ka sii darayo cudurka COVID-19 ee aad u faafa.

Illaa iyo maanta, Denver waxa ay:

- 6,090 xiriir la yeelatay ganacsiyada iyo shacabka kuna saabsan u hoggaansanaanta amarka guryaha jooga.
- Bixisay 1,796 digniin ah
- Maxkamadda ugu yeertay 14

Ka eeg lifaaqa amarka caafimaadka dadweynaha macluumaad dheeri ah, oo ay ku jiraan liiska dhammeystiran ee dadka ka reeban.

Warbixinta xaaladaha maalin kasta waxaa si maalinle ah u diyaarisa Xarunta Hawlaha Degdegga ah (EOC) ee magaalada si waafaqsan tilmaamaha federaaliga ah ee maareeynta xaaladaha degdegga

ah. Warbixinta maanta waa ay ku lifaaqan tahay waxaana laga heli karaa qaybta [Diyaargarowga iyo Isku-Duwidda Maxalliga ah](#) ee bogga denvergov.org.

Xubnaha warbaahinta ee doonaya in ay email ahaan ku helaan warbixinta maalinlaha ah waa in ay macluumaadka lagala xiriirayo siiyaan JIC_News@denvergov.org. Booqo denvergov.org si aad u heshid macluumaadka ugu dambeeyay eek u saabsan gurmadka ku aaddan COVID-19.

###